



Adeegyada Tababarka Xirfadaha ee MN

Vocational Rehabilitation Services in MN

Waxa aan ahay naafo. Ma la iga caawin karaa inaan helo siina wado shaqo?

Sharciga Dowlada dhexe ee Xirfadeynta Naafada (Rehabilitation Act) waxa uu dhigayaa in noocyo badan oo adeegyo ah oo tababarka xirfadaha ah loo fidin karo dadka naafada ah si looga caawiyo inay shaqo helaan.

Minnesota waxaa jira 2 barnaamij oo bixiya adeegyada tababarada xirfadaha.

- **Barnaamijka Adeegyada Tababarada Xirfadaha (VRS)**
waxay u adeegta dadka jir ahaan/miyir ahaan naafada u ah.
- **Barnaamijka Adeegyada Gobolka ee Indhoo-layaasha (SSB)** wuxuu u adeegtaa dadka indhaha la' ama sida fiican aan wax u arag.



Sidee ayaan ku helaa Adeegyadaa?

Hadii aad doonayso adeegyada tababarada naafadu inay kaa caawiyaan inaad shaqo hesho ama shaqo ka sii shaqayaso, waa khasab inaad codsato. Nidaamyada codsigu waa kala duwan yahay iyadoo hadba ku xiran barnaamijka aad codsanayso.

◆ Adeegyada Tababarada Xirfadaha (VRS)

Waa inaad wacdo ama aad tagto xafiiska deegaankaaga ee hay'ada (VRS). Hadii aadan aqoon meesha ku yaal xafiiskaaga kuugu dhow, wac xafiiska weyn ee (VRS) ee St. Paul. Waa ay ku sheegi karaan meesha xafiiska kuugu dhowi uu ku yaal waxayna ku siin karaan lambar telefan.

Xafiis weyn ee (VRS) ee St. Paul:

- Magaalooyinka mataanaha ah (Metro Twin Cities Voice): 651-259-7366
- Khadka Lacag La'aanta ah (Toll Free Voice): 1 (800) 328-9095

Waxaad kaloo ka heli kartaa xafiiska khadka (online) ee: <https://mn.gov/deed/job-seekers/disabilities/find-vrs/>

Wixii akhbaar ee kale ka eeg warqada xogta aruursan ee [Adeeg ma ka codsan karaa VRS?](#)

◆ Hay'ada Adeegyada Gobolka ee Indhoo-layaasha (SSB)

Si aad u hesho akhbaar ku saabsan hay'ada (SSB) ama si aad u hesho codsi, wac:

- Magaalooyinka mataanaha ah Metro Area Voice: (651) 539-2300
- Khadka Lacag La'aanta ah (Toll Free Voice): 1(800) 652-9000

Waydii inaan la hadasho qof ka tiran Qaybta Horumarinta Shaqo-ku-jaynta.

Waxaad kaloo isticmaali kartaa khadka (online) codsiyada akhbaarta ee:

<https://mn.gov/deed/ssb/about/contact/locations/ssbinfoform.jsp>.

Wixii akhbaar ee kale ka hel xogta aruursan ee [Ma Ka heli karaa Adeegyo SSB?](#)

Ka waran hadii ay I diidaan?

Labada hay'adoodba (VRS iyo SSB) waxaa aad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aankooda hadii aadan ku qanacsanayn.

Eeg xogta aruursan ee [Racfaanada VRS ka](#) iyo [Racfaanada SSB](#).

Xaq baan u leeyahay. Maxaa dhici karta marka xigta?

Ka dib kolka hay'ada VRS ama SSB ay go'aansato inaad xaq u leedahay adeegyada, adiga iyo la taliyahaaga xirfadaha waxa aad ka wada shaqysaan qorshe shaqo. Qorshaha Shaqadu (EP) waxa uu dejiyaa hadafyadaada shaqo iyo wixii adeeg iyo qalab ah ee aad u baahan tahay si aad u gaarto hadafyadaada.

Eeg xogta aruursan [Qorshayaasha Shaqada](#).

Hay'adaha VRS iyo SSB kuma siin karaan adeegyo ilaa iyo inta laga sameynayo qorshaha shaqada (EP) ayna ansaxinaaan adiga iyo la taliyahaaga xirfadahu.

Inta badan, hay'ada VRS iyo SSB waxa kaliya oo ay bixiyaani waa adeegyada iyo qalabka aad u baahan tahay si aad shaqo u hesho aadna u gaarto hadafyadaada **shaqo sida loogu qoray (EP)**

Adeegyo caynkee ah ayaan heli karaa?

Adeegyadan soo socda waxaa kharashkooda la bixiyaa hadii ay muhiim u yihiin shaqo helitaada iyo sii wadashada shaqadaa. Qorshahaaga shaqo waxay u badan tahay inay ku jiri doonaa mid in ka badan oo adeegyadaa ah hadii aan laga heli karin ilo kale:

- qiimeyn lagu ogaanayo xaq u yeeladka iyo/ama baahi adeeg inay jirto



- la talin dhanka tababarada ah, hagrid, iyo u gudbin adeego
- daryelid si loo saxo cilad si kolkaa aad u shaqeyn kartid. Daryeelida kharashkeeda ma ay bixin karaan ilo kale. Kuwani waxay noqon karaan waxyaabaha sida xubnaha caaga ah ee jirka, ookolyaale ama dabiib dhanka miyirka ah oo aysan bixin ilo kale oo dhaqaale.
- Adeegyada xirfadaha iyo tababarada, oo ay ku jiraan kharashka waxbarashada khidmaha, buugaagta iyo alaabta.
- Bixinta **siyaadada** ee kharashaadka nolosha ee soo baxa inta ad ka qaybgalayso barnaamijka tababarka xirfadaha
- gaadiidka, la xiriira wixii adeegyo tababarka xirfadaha ah
- adeegyada xubnaha qoyska, hadii loo baaho, si lagaaga caawiyo inaad hesho shaqo siina wadato
- adeegyada turjubaanka dadka dhagaha ama idha la' ah, adeegyada akhriyaha, wacy-gelinta, iyo adeegyada socodka
- ku meelaynta shaqo iyo adeegyada carbiska shaqada
- adeegyada gargaarada joogta ah sida shaqo u carbinta, tababarka shaqada dhexdeeda ah iyo waxyaabaha kale ee aad u baahan tahay si aad u sii shaqayso
- adeegyada gargaarka shakhsiyanka ah
- caawimaad inta aad shaqada haysato si aad shaqadaa uga sii shaqeyso ama caawinta inaad dib u hesho shaqo
- shatiyada shaqooyinka, aaladaha, qalabka, sahayda iyo saadka hore
- tiknooljiyada dhaqancelinta, oo ay ku jiraan wax ka bedelida gaariga, isgaarsiinta iyo aaladaha dareenka
- adeegyada si looga caawiyo ardayda naafada ah sidii ay iskuulka shaqada uga aadi lahaayeen.
- Gargaar farsmo iyo adeegyo la talin ah ee iskaa-u-shaqaysiga ama horumarinta ganacsiyada yaryar



Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP)

Hadii aad tahay macmil ama codsade adeegyada hay'adaha VRS ama SSB, waxa aad wici kartaa Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP) si aad caawimaad uga hesho, hadii aad qabto su'aalo, walaac, ama ashtako ku saabsan adeegyada tababarada xirfadaha. Hay'ada (CAP) **ma bixiso** adeeyo tababaro xirfadeed ah oo toos ah, sida, tacliin, tababarid, ama qalab. Eeg warqadayada xiga aruursan ee [Mashruuca Gargaarka Macmilka](#).

CAP waxa ay qayb ka tahay Xarunta Sharciyada Dadka Naafadda ee MN [MN Disability Law Center (MDLC)]. Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan (CAP) ama sida loo codsado adeegyada (CAP), ka wac:

- (612) 334-5970 (agagaarka beledyada)
- 1-800-292-4150 (gobolka oo dhan)



Waxa aanu joognaa:

Minnesota Disability Law Center
111 North 5th Street, Suite 100
Minneapolis, MN 55403

<https://mylegalaid.org/disability-law-center/>

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.